




Racecourse Road, Flemington

Xaashida Xaqiiqda ee Mashruuca

Homes Victoria, oo ay weheliso shirkadda aan faa'iido doonka ahayn ee Building Communities, ayaa qorsheyneysa in ka badan 800 guri oo ku ooli doona 2 dhisme oo cusub kuwaas oo laga dhisayo xaafadda Flemington. Ugu yaraan 400 oo ka mid ah guryaha cusub ayaa la qorsheynayaa inay noqdaan guryo bulsho/dowlad. Guryaha cusub ee la soo qorsheynayo ayaa dhamaantood waxay noqon doonaan kuwo ku shaqeeya koronto isla markaasna dhaqaaleynaya korontada.

Qorshayaasha la soo jeediyay, dhisme kastaa wuxuu yeelan doonaa meel dabaqa ugu koreeya ah oo loogu talagalay dadka goobta degan meeshaas oo leh dariiqyo iyo dhir lagu qurxiyay iyo meelo banaan oo ay bulshadu isticmaali karto iyo meelo dhir leh.

Haddii la ansixiyo, mashruucan waxaa la filayaa inuu bilaabmo dabayaaqada 2026.



Khariidad muujinaysa dhismaha ka socda Racecourse Road iyo hareeraheeda

Dhismaha Debneys Park (Dhismaha 4CD)

- Inta u dhaxaysa 6 iyo 26 dabaq
- In ka badan 400 oo guri (hal, 2, 3, 4 iyo 5 qol jiif)
- Qolal bulsho oo siyaabo kala duwan loo isticmaali karo
- Meelo aan ahayn guryo la degi karo oo loo isticmaali karo dukaamo, maqaayado iyo adeegyo caafimaad
- Xafiis goobta ku yaal oo loogu talagalay kuwa bixiya hay'adaha bulshada



Aragtida farshaxamiistaha ee ku aadan barxada Debneys (Dhismaha 4CD)

Dhismaha Racecourse Road (Dhismaha 3BC)

- Inta u dhaxaysa 20 iyo 36 dabaq
- In ka badan 400 oo guri (hal, 2, 3 iyo 4 qol jiif)
- Meel loogu talagalay supermarket cusub
- Meelo banaan oo aan la degi karin balse loo isticmaali karo maqaayado iyo dukaamo



Aragtida farshaxamiistaha ee ku aadan Racecourse Road (Dhismaha 3BC)

Wax badan ka ogow

Wixii macluumaad dheeraad ah ama haddii aad doonayso inaad iska diiwaangeliso ogeysiisyada ku aadan wixii ka soo cusboonaado mashruuca fadlan ka wac kooxda Homes Victoria **1300 870 250** ama noogu soo dir emayl flemington@homes.vic.gov.au



Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan booq: homes.vic.gov.au/projects/racecourse-road-flemington



Fasiraada

Si aad ugu akhrido luqadaada fadlan iskaan garee QR koodhka ama booq



homes.vic.gov.au/translations

